

## **Jaaliyadda Ottawa – Canada oo Afur dhaqaale uruuriin ah u samaysay**

### **Abaaraha Soomaaliya**

Waxaa maalintii jimcaha ahayd lagu qabtay Barnaamij Afur ah oo loogu talagalay sidii dhaqaale loogu uruuriin lahaa dadka ku waxyeeloobay abaaraha ka jira koonfurta Soomaaliya.

Barnaamiskaasi waxaa soo aabaabulay ururka Saaxiibada Kanada ee Soomaaliya (Canadian Friends of Somalia) oo kaashanaya ururada iyo Ganacsatadata kale ee Soomaaliyeed ka jira Ottawa Canada sida: Somali Centre for Family Services , Arladun Somali Canadian Society, Barwaaqo Store, Sambuzi Restaurant, Al-Huda Plaza, Amal Express, Iftin Express iyo Qaran Express .

Ayaado Qur'aan ah oo uu akhriyay Qaari Axmed Sadiq kadib , waxaa Xafladaasi furay Gudoomiyaha ururka Canadian Friends of Somalia, Mudane Faarax Maxamuud Aw-Cismaan, isagoo taabtay baaxada ay le'egtahay aafada abaareed ee ku habsatay malaayiinta qof ee Koonfurta Soomaaliyeed, NFD-Kenya, iyo Gobolka Soomaalida ee Itoobiya.

Mudane Faarax wuxuu taabtay in dhibaatadaan ay sababtay dagaalka dabada aan joogsiga lahayn , sicir bararka Cuntada, Dhaqaale iyo shaqo la'aanta ka jirta deegaamadaasi, arxan darada Al-Shabaab , taagyara idowlaadeed iyo ihmaalka beesha caalamka taas oo buu yiri sababtay in laga hortagi waaya dhibaatadan laga digayay labadii sano ee la soo dhaafay.

Wuxuu tilmaamay in maanta lagaaray wakhtigii ay beesha caalamku kaga dhabayn lahayd in xal waafi ah oo lagu soo afjarayo aafiooyinka, abaaraha, iyo amaan xumada bad iyo bariba ka taagan Soomaaliya, maxaayeelay buu yiri dhibaatada Soomaaliya waxay maanta noqotay dhibaato saamayn ku yeelatay amniga, ganacsiga iyo gargaarka caalami. Wuxuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay in shacabka Soomaliyeed oo qudhii aysan wax ka qaban karin soo afjarista mushkilada Soomaliya, iyo dhib u dhiska haykalkii dowlaadeed,shaqo, iyo dhaqan dhaqaale.

Waxaa marti sharaftii ka hadashay goobta ku mid ahaa: Gudoomiyaha Gobolka Ontario Mudane Dalton McGuinty, oo sheegay inuu ku faraxsan yahay inuu ka soo qaybgalo Afurka, si buu yiri uu u garab istaago Jaaliyadda Soomaaliyeed ee Ontario oo ah mid ku dhow 200,000 oo Soomaliyeed, wuxuu kaloo sheegay inuu ka gabol ahaan bixinayo \$1,000,000 oo doolar taas oo buuyiri uu gobolku ugu tabarucay dadka ku waxyeeloobay abaaraha.

*“To have nothing to eat is a frightening and unimaginable idea for many of us and a sad reality for millions of people in the Horn of Africa. Ontarians come from all over the world and many people have friends and family in the midst of the crisis. Now is the time for us to work together to offer our support and I encourage all Ontarians to help in the relief effort.” Dalton McGuinty, Premier of Ontario*

Waxaa iyaduna ka hadashay goobtay Marwo Lois Brown oo ah Xoghayaha Baarlamaanka u Qaabilsay Wasiirka Deeqda ee Canada, waxay Marwo Lois sheegtay in Wasiirka deeqdu uu tahay Dhadhaab, ayna indhaheeda ku soo aragtay dhibaatada iyo baahida jirta iyo baaxada ay le'egtahay sidaa awgeedna ay dowlada Canada balanqaaday \$50 Milyan oo cusub oo lagu saa'idinayo \$22 Milyan oo

ay horay dowladu u bixisay, waxaa intaa sii dheer bay tiri in dowladu furtay Qasnad ay ugu talo gashay inay ku shubto shilin kasta oo ay ururada gargaarku uruuriyaan shilin u dhigma ay halkaasi ku shubto dabadeedna dib loogu disho nolosha dadka abaarto aafaysay.

Marwo Naciimo Cali oo ah wakiilka ururka SCERDO ayaa goobta ka hadashay sheegtayna wax qabadka ururkan iyo sida ay damacsanyihiin inay wax uga qabtaan abaarta. Gabyaa Cali Maxamed iyo Gabyaa Xabiibo Cali ayaa gabayo quluunta dhagaystayaasha dhaqaajiyay goobta ka tiriyay, meesha uu Mudane Hared Salad oo ka mid ahaa dhalintii ku kortay xerada Qaxootida ee Dhadhaab maantana nasiib u yeeshay inuu tacliin waxbarasho ka helo Kanada uu ka sheekeeyay nolosha runta ah ee ka jirta xerada qaxootida ee Dhadhaab.

Xafladaasi waxaa ka soo qaybgalay 300 oo qof oo ka kala socda Jaaliyadda Soomaaliyeed, Muslimka Ottawa iyo Mujtamacal kale ee Kanadiyaanka ah. Sidoo kale waxaa goobjoog ka ahaa Safiirka Soomaaliya u fadhiya Indiya Marwo Ebyan Ladane, Mudane David McGuinty oo xubin ka ah Baarlamanka Canada, Mudane Bob Chiarelli oo xubin ka ah Baarlamanka Ontario isla markaana ah Wasiirka Howlaha Guud iyo Dhismaha. Xafladaasi Afur waxaa daadihinayay Const. Cabdul Cabdi.

Wariye: Mohamed Ali

Ottawa, Canada













